

Kulanka Mudnaanta Bulshada ee 72 Parris

Isniinta Abriil 14-keeda, 4:30-7:30 galabnimo,

Xarunta McGoldrick ee USM ee Portland

Casho iyo cabitaan ayaa la bixin doonaa

Waxaa lagugu martiqaadayaa inaad go'aamiso mustaqbalka 72 Parris Street, ee loogu yaqaannay *Fork Food Lab*. Xagaagii hore waxa aanu bilownay hab bulshadeed oo lagu naqshadaynayo si aan u go'aamino mustaqbalka hantidan. Guddiga *72 Parris Steering Committee* waxay baareen fikradahan waxayna dib ugu warbixin doonaan bulshada. Kaalay ka qaybqaado oo ka caawi sidii loo go'aansan lahaa isticmaalka kama dambaysta ah ee ku salaysan baahiyaha bulshada, ee suuragal ah bulshadana saamaynta ugu wayn ku yeelan kara.

Waxaan raadineynaa inaan ka dhigno habkan mid la wada og yahay oo loo wada dhan yahay. Si taas loo gaaro, waxan bixin doonnaa **tarjumaad Faransiis, Boortaqiis, Isbaanish, Soomaali iyo Carabi** ah oo ka turjumi doona kulankan Jaaliyada. Carruurtana waa laguu hayn karaa haddii aad u baahan tahay.

Fadlan ka jawaab foomka Shirka Mudnaanta Bulshada ugu danbayn **Abriil 7-deeda** oo tan u gudbi shabakadahaaga iyo xubnaha bulshadaada.

Fiiri maqal iyo muuqaal iyo xog badan oo ku saabsan habka loo marayo mareegahayaga.

Ma iman kartaa 14-ka? Wali waan u baahannahay taladaada! Fadlan noo sheeg si aan boos kuugu qabanno, waxaan kuu soo diri doonaa foom online ah oo aad buuxin karto kulanka ka dib.
